**Adeegga Caadiyeynta iyo Socdaalku (Immigration and Naturalization Service (INS)) hadda wuxuu yahay qayb ka mid ah Waaxda Nabadsugidda Gudaha (Department of Homeland Security (DHS)) iyadoo dib loogu magic bixiyey dibna loogu habeeyey:**

1. **Guddiga Adeegga Socdaalka iyo Muwaadinnimada (Bureau of Citizenship and Immigration Services (BCIS))**
2. **Guddiga Dhowridda Xudduudda iyo Hawlaha socdaalka (Bureau of Customs and Border Protection (CBP))**
3. **Guddiga Dhaqangelinta Hawlaha Socdaalka iyo Socdaalka (Bureau of Immigration and Customs Enforcement (ICE))**

**dhammaanba seddexda guddi waxay qayb ka yihiin DHS waxaana loo tixraaci doonaa "DHS" iyadoo loogu talogalay ujeeddooyinka qaabka qoraalkaan.**

## I. KA WARRAN HADDII WAKIILLADA BOOLISKA, FBI AMA DHS AY ILA SOO XIRIIRAAN?

***S: Miyaan ka jawaabaa sxu'aalaha ay wakiilladu I weydiiyaan?***
***J:*** Waxaad xuquuq dastuuri ah u leedahay inaad ka aammusto. Denbi ma ahan in la diido in laga jawaabo su'aalaha. Waa fikrad aad u wanaagsan in lagala hadlo arrinka qareen ka hor intaadan oggolaan inaad ka jawaabtid su'aalaha. Cidna ha la hadlin xataa haddii lagu xidho, ama xataa haddii aad xabsiba ku jirtid. Xaakin keliya ayuunbaa kugu amri kara inaad su'aalaha ka jawaabtid.

***S: Miyaan la hadli karaa qareen?***
***J:*** Waxaad xaq u leedahay inaad la hadashid qareen ka hor inta aadan su'aalaha ka jawaabin haddii uu boolisku xuquuqdaas kuu sheegay iyo haddii kaleba. Qareenka shaqadiisu waa inuu difaaco xuquuqdaada isla marka aad sheegtid inaad dooneysid inaad la hadashid qareen, saraakiishu waa iney joojiyaan su'aalaha ay ku weydiinayaan. Haddii aadan qareen lahayn, waxaad weli sarkaalka u sheegeysaa inaad dooneysid inaad la hadashid qareen ka hor inta aadan su'aalaha ka jawaabin. Haddii aad qareen leedahay, hayso kaarka cinwaannadiisa ama cinwaannadeeda. Tus kaarka sarkaalka, weydiisana inuu u yeedho qareenka. Xusuusnow inaad baare kasta oo ku soo boogda ka qorto magaca, hay'adda iyo lambarka telefoonka, isla markaana isla markaana aad akhbaartaas siisid qareenkaaga.

***S: Miyey wakiilladu baari karaan gurigeyga ama xafiiskeyga?***
***J:*** Booliska ama wakiillada kale ee dhaqangelinta sharciyadu ma baari karaan gurigaaga inaad adigu oggolaansho siiso mooyaane, ama ay oggolaansho maxkamadeed wataan. Oggolaanshada baariddu waa amar maxkamadeed kaasoo booliska u oggolaanaya iney baarid cayiman sameeyaan. Carqaladeyn baaritaanka lagu sameeyaa ma joojin doonto baaridda waxayna kuu keeni kartaa in lagu xidho. Laakiin waa inaad si cad u sheegtaa inaadan oggolaansho bixin isla markaana uu baaritaanku rabitaankaaga liddi ku ahaa. Qofka kula deggen ama martidaadu si sharci ah ayey u oggolaan karaan baaritaanka gurigaaga lagu sameynayo haddii uu boolisku rumeysan yahay in ruux uu awood u leeyahay inuu oggolaansho bixiyo. Booliska iyo dhaqangeliyeyaasha sharcigu waxay u baahan yihiin oggolaanshada maxkamadda si ay u baaraan xafiis, laakiin shaqaaleeyahaagu wuxuu oggolaan karaa in la baaro goobta aad ka shaqeysid iyadoon oggolaanshadaada la haysan.

***S: Ka warran haddii wakiilladu ay oggolaanshada baaridda wataan?***
***J:*** Haddii aad joogtid marka wakiilladu baaritaanka u imaanayaan, waxaad weydiin kartaa oggolaanshada. Oggolaanshadu waa iney si gaar ah u faah faahisaa goobaha la baarayo iyo dadka iyo alaabta lala tegayo. Qareenkaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah ugu wac. Weydii in laguu oggol yahay inaad baaritaanka daawatid haddii laguu oggolaado, waa inaad isha ku haysaa. Qoraal sameeye kuna dar qoraalkaaga magacyada, lambarrada calaamadaha, hay'adda uu sarkaalku ka socdo, meesha ay baareen iyo waxa ay qaateen. Haddii dad kale ay joogaan, si taxadar leh dusha ha ugala socdaan waxa dhacaya si ay kuugu marqaati furaan.

***S: Miyey tahay inaan su'aalaha ka jawaabo haddii uu boolisku oggolaansho wato?***
***J:*** Maya. Oggolaanshada baaridda micnaheedu maahan iney tahay inaad su'aalaha ka jawaabtid.

***S: Ka warran haddii aysan wakiilladu oggolaansho haysan?***
***J:*** Waa inaadan u oggolaan boolisku iney gurigaaga baaraan, mana ka jawaabeysid su'aalahooda. Boolisku diidmadaada uma isticmaali karaan iney ku helaan oggolaansho.

***S: Ka warran haddii wakiilladu aysan oggolaansho haysan, laakiin ay ku sii adkeystaan iney gurigeyga baaraan xataa diidmadeyda dabadeed?***
***J:*** Ha ka hor istaagin baaridda. Haddii uu qof kale joogo, weydii isaga ama iyadu iney marqaati ka noqdaan inaadan baaritaanka oggoleyn. Sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah u wac qareenkaaga. Qoro magacyada iyo lambarrada calaamadaha feedhaha ugu dheggen saraakiisha wax baaraya.

***S: Ka warran haddii aan si kastaba la hadlo wakiillada dowladda?***
***J:*** Wax kasta oo aad ku tiraahdo qolada dhaqangelinta sharciga adiga iyo kuwa kaleba waa la idiin isticmaali karaa. Maskaxda ku hay in been u sheegidda sarkaal dowladeed ay tahay denbi. Laakiin ka aamusidda ilaa iyo inta aad kala tashaneysid qareenkaagu maahan denbi. Xataa haddii aad horeba dhowr su'aalood uga jawaabtay, waad diidi kartaa inaad ka jawaabtid su'aalaha kale ilaa aad qareen ka heshid.

***S: Ka warran haddii uu boolisku waddada igu joojiyo?***
***J:*** Weydii haddii aad xor u tahay inaad tagto. Haddii jawaabtu ay tahay haa, go'aanso inaad isaga dhaqaaqdid. Haddiise uu boolisku yidhaahdo xarig baad tahay, aadanna xor u ahayn inaad iska tagto, markaas way ku xirayaan. Boolisku waxay taataaban karaan korka dharkaaga haddii ay hayaan sabab ay uga shakiyaan inaad hub wadatid aadna khatar tahay. Haddii ay wax intaa ka badan kaa baaraan, si cad u dheh, "ma oggoli in la baaridda." Si kastaba waxaa laga yaabaa iney ku sii baaraan. Looma baahno in aad ka jawaabto su'aaladaha haddii lagu xiro ama xabsiga laguu dhiga hal arin oo muhiim ah. Booliiska waxay ku weydiinayaan magacaada goorta lagu qabto ama lagu haayo, Gobolada qaarkood waa laguu xiri karaa diidmada inaad magacaada sheektid.

***S: Ka warran haddii boolisku i joojiyo anigoo baabuurkayga ku jira?***
***J:*** Ku hay gacmahaaga meel uu boolisku ka arki karo. Maahan inaad baarid oggolaatid. Laakiin haddii uu boolisku sabab dhab ah, markaas baabuurkaaga waa la baari karaa adigoon oggolaansho lagaa helin. Saraakiishu waxaa laga yaabaa iney kala kaxeeyaan rakaabka iyo wadeyaasha si ay su'aalo u weydiiyaan ka dibna isu bar bar dhigaan jawaabahooda.

***S: Ka warran haddii booliska ama FBI ay iigu hanjabaan iney maxkamad weyn I horgeynayaan haddii aanan ka jawaabin su'aalahooda?***
***J:*** Horgeynta maxkamad weyn waa amar qoraal ah oo aad ku tegeysid maxkamadda isla markaana aad xaqiijineysid wixii war ah oo aad haysid. Haddii booliska ama FBI ay kuugu hanjabaan iney maxkamad kuugu yeerayaan, waa inaad isla markaasba qareen u wacataa. Wax kasta oo aad tidhaahdid dhab ahaantii adiga ayaa laguu isticmaali karayaa.

***S: Miyaan ka jawaabaa su'aalaha haddii la xiro?***
***J:*** Maya. Haddii lagu xiro, ma ahan inaad bayaan ama jawaab ka bixisid wax kasta oo su'aalo ah. Isla markiiba weydiiso qareen. Waa inaad mar walba la hadashaa qareen ka hor inta aadan go'aansan inaad ka jawaabtid wax su'aalo ah.

***S: Ka warran haddii booliska ama FBI ay si xun iila dhaqmaan?***
***J:*** Qor lambarka baajka calaamadda feedhaha ugu dheggen, magaciisa, ama wixii kale macluumaad aqoonsi ah. Waxaad xaqu leedahay inaad weydiisid sarkaalka macluumaadkiisaas. Isku day inaad heshid markaati iyo magacyadooda iyo lambarrada telefoonnadooda. Haddii lagu dhaawaco, dalbo daaweyn isla markaana sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo sawirro uga qaado dhaawaca. U waco qareen.

## II. KA WARRAN HADDII AANAN AHAYN MUWAADIN ISLA MARKAANA AY DHS ILA SOO XIRIIRTO?

***Xaqiiqso xuquuqahaaga.*** Haddii aadan dalban xuquuqahaaga ama haddii aad saxiixdid warqado xuquuqahaaga meesha ka saaraya, markaas DHS waxaa laga yaabaa iney ku tarxiilaan ka hor inta aadan arkin qareen ama xaakinka socdaalka. **Marna waxba saxiixin adigoon akhrin, fahmin, aananna ogaan cawaaqibta ka imaaneysa saxiixiddiisa.**

***La hadal qareen.*** Haddii ay suuragal tahay, sii qaado magaca iyo lambarka telefoonka qareeenka wicitaankaaga oggol. Sharciyada socdaalku way adag yihiin in la fahmo isla markaana waxyaabo fara badan ayaa in dhaweyd laga beddelay.

Iyadoo ku saleysan sharciyada manta, qawaaniinta iyo khadadka hagidda DHS, dadka aan muwaadiniinta ahayn waxay badanaa leeyihiin xuquuqaha hoose, aqoonsigooda socdaal wuxuu rabo ha ahaadee. Warka soo socda waxaa laga yaabaa in la beddelo, sidaa awgeed waa muhiim in lala xiriiro qareenka.

Xuquuqaha soo socda waxay ku dabbaqmayaan kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee ku sugan gudaha U.S. kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee ku sugan xuduudda kuwaasoo isku dayaya iney soo galaan U.S waxay leeyihiin xaddidaad dheeraad ah mana lahan xuquuqaha oo dhan.

***S: Miyaan xaq u leeyahay inaan la hadlo qareen ka hor inta aanan ka jawaabin wax su'al ah ee DHS ama aanan saxiixin wax warqado DHS ay leedahay ah?***
***J:*** Haa. Waxaad xaq u leedahay inaad wacdid qareen ama qoyskaaga haddii lagu xiro, waxaadna xaq u leedahay inuu qareenku xabsiga kugu soo booqdo. Waxaad xaqu leedahay inuu qareenka ku difaacayaa kula joogo waqtiga dhegeysi kasta oo ka dhacaya xaakinka socdaalka hortiisa. Xaq uma lihid qareen ay dowladdu u soo magacowday hababka socdaalka, laakiin haddii lagu xiray, saraakiisha socdaalka waxaa waajib ku ah iney ku tusaan taxanaha kuwa bixiya adeegga sharciga qiimaha jaban ama bilaashka ah.

***S: Miyaan qaataa kaarkayga cagaaran ama wixii kale ee warqado socdaal ah?***
***J:*** Haddii aad leedahay dukumenti awood kuu siinaya inaad joogtid U.S., waxaa waajib kugu ah inaad qaadatid. La soo bixidda warqado been abuur ah ama dhacay oo la tusiyo DHS waxay keeni kartaa tarxiil ama xukun denbiilennimo. Kaar cagaaran oo aan dhicin, I-94, Kaarka Oggolaanshada Shaqada (Employment Authorization Card), Kaarka ka Gudbidda Xudduudda (Border Crossing Card) ama warqadaha caddeynaya

aqoonsigaaga sharciga ah ayaa qancinaya dalabkaan. Haddii aadan qaadan warqadahaan, waxaa lagugu xukmin karaa denbiga dhaqan xumida. Mar kastaba nuqulka warqadahaaga socdaalka u dhiib qof aammin ah oo qoyska ka tirsan ama saaxiib kuu soo faakis gareyn kara, haddii baahidu timaaddo. Ka hubso qareenkaaga socdaalka wixii ku saabsan arrinkaaga gaarka ah. Waxaa laga yaabaa in lagaa dalbo inaad tustid aqoonsigaaga sarkaakiisha booliska, wakiillada xuduudda jooga, iyo sidoo kale duuliyeyaasha diyaaradaha.

***S: Miyaa la iiga baahan yahay inaan saraakiisha dowladda kala hadlo taariikhda socdaalkayga?***
***J:*** Marba haddii aad tustid daliilka aqoonsigaaga, haba la sii hadlin saraakiisha in dheeraad ah - adiga uun bay kuu taal waxaad ka yeeli. Waxaad ku habboonaan lahayd inaad iska aammusnaato aadna marka ugu horreysa la hadashid qareen, iyadoo ku xiran xaaladdaada. Sharciyada socdaalku waa kuwo aad u adkayn. Waxaa laga yaabaa inaad mashaakil la kulantid hor inta aadanba ku baraarugin. Qareen ayaa xuquuqahaaga difaaci kara, talo ku siin kara, kuguna caawin kara inaad ka fogaatid bixinta jawaabo wax kuu dhimi kara. Haddii DHS ay wax kaa weydiiso diinta iyo siyaasadda aad aamminsan tahay, kooxaha aad ka tirsan tahay ama aad gacanta siisid, waxyaabaha aad sheegtay, meesha aad ka soo safartay, ama su'aalo kale oo aan u muuqan iney xaq yihiin, maahan inaad uga jawaabtid. Sarkaalku waxaa laga yaabaa inuusan kaa codsanba daliilka aqoonsiga socdaalkaaga adigoo gurigaaga joogtid ama goobaha gaarka ah iney oggolaansho u haystaan mooyaane.

***S: Haddii la ii xiro meel uga dhicidda socdaalka, miyaan xaq u leeyahay dhegeysi maxkamadeed ee xaakin socdaal hortiisa si aan na fteyda uga difaaco xukun tarxiil?***
***J:*** Haa. Xaaladaha badankooda xaakin socdaal ayaa amri kara in lagu tarxiilo. Laakiin haddii aad meesha ka saartid xuquuqahaaga ama "iskaa inaad isaga baxdo" aad qaadato, adigoo oggolaanaya inaad waddanka ka baxdo, markaas waa lagu tarxiili karaa iyadoon dhegeysi lagu keenin. Haddii denbiilennimo lagugu soo oogo, lagugu xiray xuduudda, aad U.S. ku timid barnaamijka fiiso la'aanta, ama muddadii la soo dhaafay lagugu amray in lagu tarxiilo, markaas waa lagu tarxiili karaa iyadoon dhegeysi laguu qaban. Si deg deg ah qareen ula xiriir si aad u aragtid haddii ay jiraan wax gargaar ah oo laguu sameyn karo.

***S: Miyaan wici karaa qunsuliyaddeyda haddii la i xiro?***
***J:*** Haa. Kuwa aan muwaadiniinta ahayn ee lagu xiray U.S. gudaheeda waxay xaq u leeyihiin iney wacdaan qunsuliyadahooda ama boolisku uu u sheego qunsiliyadda xariggooda. Booliska waxaa waajib ku ah inuu qunsuliyaddaada u oggolaado iney ku soo booqato ama kula hadasho haddii saraakiisha qunsuliyaddu ay sidaa go'aansadaan. Qunsuliyaddaadu waxaa laga yaabaa iney kaa caawiso inaad qareen heshid ama caawino kale kuu bandhigaan.

***S: Maxaa dhacaya haddii aan joojiyo xuquuqdeyda dhegeysiga ama aan ka baxo U.S. ka hor inta uusan dhegeysigu dhammaan?***
***J:*** Waxaad waayeysaa u qalmiddaadii manfacado dhowr ah ee socdaalka, waxaana lagaa mamnuuci karaa inaad U.S. ku soo noqoto mus taqbalka tiro sanado ah. Waa inaad mar walba la hadashaa qareenka socdaalka ka hor inta aadan go'aansan.

***S: Maxaan sameeyaa haddii aan doonayo inaan la xiriiro DHS?***
***J:*** Mar kasta la hadal qareenka ka hor intaadan la xiriirin DHS, xataa telefoon kula hadal. Qaar badan oo ka tirsan saraakiisha DHS waxay u arkaan "dhaqangelintu" iney tahay shaqadooda asaasiga ah isla markaana sharraxaad kaama siin doonaan waxyaabaha kuu furan oo dhan.

## III. MAXAY YIHIIN XUQUUQAHAYGA GAROONKA DIYAARADUHU?

**QORAAL MUHIIM AH:** ***Sharci darro ayey ku tahay dhaqangelinta sharcigu iney sameeyaan mid ka mid ah joojinnada soo socda, baaridyo, xirid, ama ka saarid ku saleysan jinsiyaddaada, asalka qarankaaga, diintaada, jinsigaaga, ama haybtaada.***

***S: Haddii aan U.S. warqado sax ah ku soo galayo miyey wakiillada arrimaha socdaalka U.S. awood u leeyihiin iney I joojiyaan ayna I baaraan?***
***J:*** Haa. Wakiillada arrimaha socdaalku waxay xaq u leeyihiin iney joojiyaan, xiraan, isla markaana baaraan qof kasta iyo shay kasta.

***S: Miyaa boorsooyinkayga ama anigaba la i baari karaa ka dib markaan soo maray aaladda wax xasaasta oo aan waxna iga sheegin ama ka dib marka ay nabadsugiddu arkaan in shay laga arkay aaladda wax sawirta uusan ahayn hub?***
***J:*** Haa. Xataa haddii shaashadda bilowga ee boorsooyinkaagu aysan muujin wax shaki laga qaadi karo, kuwa dadka baaraa waxay awood u leeyihiin iney baaritaan dheeraad ah boorsooyinkaaga ku sameeyaan.

***S: Haddii aan saaranahay dayuurad, miyuu shaqaale dayuuradeed xogwaresi ila yeelan karaa ina weydiin karaa inaan dayuuradda ka dego?***
***J:*** Duuliyaha dayuuraddu wuxuu xaq u leeyahay inuu diido inuu qaado rakaab haddii isagu ama iyadu ay rumeysan yihiin inuu rakaabku khatar ku yahay ammaanka duullimaadka. Go'aanka duuliyuhu waa inuu ahaadaa mid macquul ah kuna saleysan u kuurgelid laguu kuurgalay adiga, ee maahan waxa la iska aamino.

**HADDII LAGU CAYIMAY** laguguna cayimay madaarka, fadlan buuxi Foomka Dacwada Cayimidda Rakaabka (Passenger Profiling Complaint Form) kaasoo laga heli karo qaybta Sinnaanta Jinsiyadaha ama website-keenna www.aclu.org/airlineprofiling

## WARKA LA XIRIIRIDDA SOO DIRIDDA

**Guddiga Lidka-Takooridda Carabta-Maraykanka [American-Arab Anti-Discrimination Committee] (ADC):**
**(202) 244-2990**

**Ururka Qareennada Socdaalka Maraykanka [American Immigration Lawyers Association] (AILA):**
**1-800-954-0254**

**Maalgelinta Waxbarashada iyo Difaaca Sharciga ah ee Aasiyaanka Maraykanka [Asian American Legal Defense and Education Fund] (AALDEF):**
**(212) 966-5932**

**Golaha Xiriirka Islaamka Maraykanka [Council on American-Islamic Relations] (CAIR):**
**(202) 488-8787**

**Ururka Qareennada Qaranka [National Lawyers Guild]:**
**(212) 679-5100**

**Mashruuca Socdaalka Qaranka [National Immigration Project]:**
**(617) 227-9727**

**Guddiga U.S. ee Xuquuqda Rayidka [U.S. Commission on Civil Rights] (UCCR):**
**(800) 552-6843**

---

**WAXAA DAABACAY:**
**ACLU Ololeynta ka Dhanka ah Cayimidda Jinsiyadeed**

---

URURKA XORRIYADDA RAYIDKA MARAYKANKA (THE AMERICAN CIVIL LIBERTIES UNION) waa ilaaliyaha xorriyadda qaranka ee ugu sarreeya, maalin walbana ka shaqeeya maxkamadaha, mujtamacayada iyo qawaaniinta si ay u difaacaan una dhowraan xuquuqda qofka iyo xorriyadihiisa uu ugu deeqday Dastuurka iyo sharciyada Mareaykanku.

**SARAAKIISHA IYO ISU DUWEYAASHA**

NADINE STROSSEN, Madaxweyne
ANTHONY ROMERO, Isu duwaha Fulinta
KENNETH B. CLARK, Madax,
Golaha Guddiga Fulinta
RICHARD ZACKS, Khasnaji

**Waxaa dib u eegid lagu sameeyey 10/24/03**

# OGOW XUQUUQA-HAAGA

## Maxaan Sameeyaa Haddii ay Su'aalo i weydiiyaan Booliska, FBI, Wakiillada Hawlaha Socdaalku, ama Saraakiisha Socdaalkau

ACLU
AMERICAN CIVIL LIBERTIES UNION

SOMALI